

# Dadka khatarta ugu jira COVID-19


## 1. Ka war haynta



## 2. Kaaratiin



## 3. Baaritaan ku socdo



## 4. Takoorid



Khobarada caafimaadka dadwaynuhu ayaa badanaa adeegsado erayada soo socda marka cudur dillaaco:

- Qofafka eegisi ku socoto
- Qofafka uu baaritaan ku socdo, iyo Takoor.
- Kaaratiin

Si loo fahmo erayadan, waxaa muhiim ah ogaanshaha haddii qofku leeyahay astaamo. Sidoo kale waxaa muhiim ah fahmida haddii qofku ama kooxdu ay ka soocan yihiin dadka kale.






Marka si guud loo hadlo, **dadka eegistu ku socoto** waxa loo yaqaan dadka:

- Aan lahayn wax calaamado xanuun ah, oo
- Laga yaabo inay baylah u noqdeen cudur ku faafi kara dadka kale.
- Dadku waxa dhici karta inay COVID-19 baylah ugu noqdaan:
  - » Taabashada qof kale oo qaba COVID-19, ama
  - » U socdaalidda meel uu fayrasku aad ugu firfircoon yahay.
- Calaamadaha xanuunka ee COVID-19 waxa kamid ah:
  - » Xummad
  - » Qufac, iyo
  - » Neefsashada oo ku adag.
- Dadka eegista ay ku socoto waa inay iska eegaan astaamahan. Waxa sidoo kale dhici karta inuu caafimaadkooda la socdo dayreel caafimaad bixiye ama xirfadlaha caafimaadka dadwaynaha.
- Khubarada caafimaadku waxa dhici karta inay u sheegaan dadkan inay dhaqdhaqaaqa iyo taabashada dadka kale yareeyaan.

WAAXDA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA

Oregon  
Health  
Authority

 <p><b>2</b> Kaaratiin</p>	<p><b>Kaaratiinka</b> wuxuu gooni u soocaa oo uu xaddidaa dhaqdhaqaaqa dadka ama kooxaha laga yaabo inay:</p> <ul style="list-style-type: none"><li>• Baylah u noqdeen xanuunka ama</li><li>• caabuqa qabaan laakiin bilaa astaamo yihiin.</li></ul> <p>Saraakiisha caafimaadku mararka qaar waxay siticmaalaan kaaratiinno haddii ayna garanayn in cudurku faafi karo kahor inta qofku aannu yeelan calaamadaha xanuunka.</p>
 <p><b>3</b> Baaritaan ku socdo</p>	<p><b>Dadka baaritaanku ku socdo</b> waa kuwa baylah u noqday cudur kadibna astaamihii yeeshay; saraakiisha caafimaadka waxa walwal ku haya iyagu sidoo kale inay xanuunka qabi karaan oo ay dadka kale qaadsiiin karaan.</p> <p>Saraakiisha caafimaadku sida badan waxay rabaan inay wax badan ka ogaadaan dadkan iyo xanuunkooda. Kadibna waxay si fiican u fahmi karaan sida looga hortago faafitaanka xanuunka.</p> <ul style="list-style-type: none"><li>• Dadku waxa dhici karta inay baylah ugu noqdaan COVID-19:<ul style="list-style-type: none"><li>» Taabashada qof buka, ama</li><li>» U socdaalidda meel uu fayrasku aad ugu firfircoon yahay.</li></ul></li><li>• Calaamadaha xanuunka COVID-19 waxa kamid ah:<ul style="list-style-type: none"><li>» Xummad</li><li>» Qufac, iyo</li><li>» Neefsashada oo ku adag.</li></ul></li><li>• Saraakiisha caafimaadku waxa dhici karta inay u sheegaan dadkan inay yareeyaan dhaqdhaqaaqooda iyo taabashada dadka kale. Saraakiisha caafimaadku waxay weydiistaan kuwa baylah u noqday COVID-19 inay dadka kale gooni uga baxaan iyagoo ka dheeraanaya:<ul style="list-style-type: none"><li>» Dadka</li><li>» Meelaha dadwaynuhu ku kulmaan, iyo</li><li>» Shaqada ama dugsiga.</li></ul></li><li>• Saraakiisha caafimaadku waxay weydiisan karaan qaar kamid ah dadkan in cudurka laga baaro.</li></ul>
 <p><b>4</b> Takoorid</p>	<ul style="list-style-type: none"><li>• <b>Takoorka</b> wuxuu ka soocaa dadka xanuusanaya dadka kale ee caafimaadka qaba. Takoorku wuxuu xaddidaa dhaqdhaqaaqa dadka xanuunka qaba si looga hortago faafidda cudurka.</li></ul>

Waxaad ku heli karta dokumentigan luuqado kale, far waawayn, farta indhoolaha ama qaabka aad doorbidayso. Kala xiriir Kahortagga Cudurrada Degdegga ah iyo Kuwa Faafa 971-673-1111 ama iimeylka [OHD.ACDP@dhsosha.state.or.us](mailto:OHD.ACDP@dhsosha.state.or.us). Waannu qabanaa dhammaan wicitaanada gudbinta ama waxaad wici kartaa 711.